

FAAFINTA

RASMIGA

الرسمية



الجريدة

## DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA

لولاية أرض بونت الصومال

Sanadka 15-aad. Garowe July 22, 2013

Lam.07

Faafinta bil walba soo baxda

جريدة الشهرية

### Qaybt Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland

Qiimuhu waa Sh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170,000 dalka gudihiisa, dalka dibaddiisa Sh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3,000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

### TUSMADA

#### Qaybta Koowaad

#### Ansixin Xeerka Hab-maamuuska.

#### Qaybta labaad

#### Xeer

#### Waxba ma leh


#### Qeybta Saddexaad

Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.

**Waxba ma leh**

*Sharci Lr 06. ee 22/07/2013, kuna saabsan Ansixin Xeerka Hab-maamuuska.*

DAWLADDA PUNTLAND  
EE SOMALIYA



ولاية بنت لاند الصومال

GOLAHA WAKIILADA

مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha  
Office of the Speaker

Ref:- XGGW/DPL/ 56 /2013 Garoowe, Axad Date:-21/07/2013

Ku:- Madaxweynaha DPL

Garoowe

Ujeedo:- Ansixin Xeerka Hab-maamuuska

**Guddoomiyaha Golaha Wakiilladdu:-**

MARKUU ARKAY:- Dastuurka DPL Qodobkiisa 64-aad

MARKUU ARKAY:- Soo gudbinta Xildhibaanada  
20/07/2013 Mooshin ku saabsan wax ka  
bedelka Xeerka hawlgabka (Bayshanka)  
Sharci Lr.6 ee 15/01/2007.

MARKUU TIXGELIYEEY:- Baahida loo qabo Ansixinta Xeer Hab-  
maamuuska Mas'uuliyiinta Dastuuriga ah

MARKUU DHEGAYSTAY:- Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiillada.

**WUXUU GUDDOOMIYEEY:-**


1. In hab-maamuuska Madaxweynuhu uu noqdo marka uu xilka banneeyo Mushaharkiisa bil walba lana sugo amnigiisa
2. Hab-maamuuska Madaxweyne ku xigeenku uu noqdo marka uu xilka banneeyo Mushaharkiisa bil walba lana sugo amnigiisa
3. Hab-maamuuska Guddoomiyaha G/Wakiilladu uu noqdo marka uu xilka banneeyo Mushaharkiisa bil walba lana sugo amnigiisa
4. Hab-maamuuska 65-ta Xildhibaan ay noqdaan marka ay xilka banneeyaan in la siiyo 12-bilood Mushaharkood.

Allaa Mahad Leh

Cabdirashiid Maxamed Xirsi  
Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL

Golaha Wakiillada DPL

*me me*







PUNTLAND STATE OF SOMALIA

Sharci Lr.06 ee July 20, 2013, kuna saabsan Xeerka Hab-maamuuska.

Madaxweynaha Dawladda Puntland

Markuu arkay: Dastuurka Dawladda Puntland;

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad  
XGGW/DPL/56/2012 ee 21/07/2013;

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda Xeerkani u leeyahay Dawladda Puntland;

**Wuxuu soo saaray**

Sharciga soo socda:

**Qodobka 1-aad**


Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Xeerka Hab-maamuuska.

**Qodobka 2-aad**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa  
Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee  
Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee DPL.

**Qodobka 3-aad**

Dhaqangalka Xeerkani wuxuu noqonayaa maalinta  
Madaxweynuhu saxiixo, kadibna lagu soo saaro faafinta rasmiga  
ah ee Dawladda Puntland, iyadoo xeerkani sharci noqonayaa, cid  
kastana ay waajib ku tahay inuu dhawro kuna dhaqmo xeerkan.

  
Dr. Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud  
Madaxweynaha Dawladda Puntland